



KU CODBIXINTA XUKUN

DEMBI WEYN

Haa, waxaa kuu soo noqonaya xaqaaga codbixinta!

Hagaha codbixinta ka dib xukunka dembi weyn (felony) ee **Gobolka Washington**

Codbixinteenu waa codkeena. Xaqa codbixintu waa dhagaxa aasaaska u ah dimoqraadiyaddeena. Taariikhda waddankeena waxaa ka muuqda oo lagu soo maray halganno iyo dagaallo sharciyeed oo lagu guulaystay si loo hubiyo in xaqa codbixintu uusan ahaanin mudnaan gaar u ah dadka tiro yar ee qaniga ah, laakiin xaq hubaal u ah dadka oo dhan, iyadoo aanan la eegayn jinsiyadda, dabaqadda, ama jinsiga.

Waa maxay nooca xukunnada dembi ee saamayn kara xuquuqdayda codbixintu?

Xaqa codbixinta ayaa qofka ka lumi kara ama laga qaadi karaa marka maxkamadda dadka qaangaarka ah loogu xukumdo dembi weyn. Xaqa codbixintu kaama lumayo marka aad Washington ka hesho xukunka gaf yar ama xukunka carruurta.

Shakhsiyaadka lagu xukumo dembiyo waaweyn miyaa ka codbixin karaan gobolka Washington?

Haa! Haddii maxkamadda qaangaarka ee Gobolka Washington lagaaga xukumay dembi weyn, xaqaaga codbixinta ayaa **toos laguugu soo celinayaa** islamarka lagaa sii daayo xukunka xabsiga buuxa ee ay kugu hayso Waaxda Xabsi dhigista (Department of Corrections) (DOC). Waxay tani ka dhigan tahay marka aad dhammaysato xukun xabsi waajib kugu ah, in xaqaaga codbixinta lagu soo celiyo marka xabsiga lagaa sii daayo waxaanad u qalmi doontaa in aad islamarkaaba waqtigaas is qorto ama is diiwaangeliso haddii aad tahay muwaadin Maraykan ah, deggan tahay gobolka Washington, oo aad tahay ugu yaraan 18 jir maalinta doorashada.

Haddii maxkamad ku taalla gobol kale ama maxkamad federaal qaangaar ahaan laguugu xukumay dembi weyn, xaqaaga codbixinta ayaa **toos laguugu soo celinayaa** marka aad ka baxdo xabsiga. Waxaad u qalmi doontaa in aad is qorto ama is diiwaangeliso islamarkaaba marka lagu sii daayo haddii aad tahay muwaadin Maraykan ah oo aad deggan tahay gobolka Washington.

Xaqa codbixinta ayaa lagu soo celinayaa xataa haddii weli lagu leeyahay ganaaxyo maxkamad, magdhaw, ama waajibaad kaloo sharciyeed oo lacag ah (legal financial obligations) (LFO-yada).

Uma baahnid in aad wada bixiso lacagaha LFO-yada ee lagu leeyahay si aad u codbixiso. Waxaa weli sharci ahaan waajib kugu ah in aad wada bixiso lacagaha LFO-yada ee lagu leeyahay oo aad xafiddo ama addeecdo jadwalka lacagbixinta. Hase yeeshee, lagaama qaadi karo ama lagaama joojin karo xaqa codbixinta marka aad bixin weydo lacagaha LFO-yada. Xaqa codbixintu kaama lumayo marka aad bixin weydo lacagaha LFO-yada.

Ma jiraa dukumeenti ama meel aan u baahan ahay in aan hubiyo si aan u xaqiijiyo in xaqaaga codbixinta la ii soo celiyey?

Maya. Iminka ma jiro dukumeenti xaqiijinaya soo celinta xaqa codbixinta (waagii hore, shahaadada sii daynta ama rukhsaynta ayaa tan samayn jirtay). Weliba ma jiro liis ay ku qoran yihiin dadka xaqooda codbixinta loo soo celiyey. Haddii aadan iminka xabsi ku jirin oo aad ka soo baxday, xuquuqdaada codbixinta ayaa lagu soo celiyey, waxaanad u qalantaa in aad is qorto ama isku diiwaangeliso codbixinta haddii aad tahay muwaadin Maraykan ah, deggan tahay gobolka Washington, oo aad tahay ugu yaraan 18 jir maalinta doorashada. **Weliba uma baahnid waraqa si aad u caddayso in xaqaaga codbixinta lagu soo celiyey.**

Miyaan weli u baahan ahay in aan is qoro ama isku diiwaangeliyo codbixinta?

Haa. Inkastoo soo celinta xuquuqda codbixinta si toos ah oo otomaatig ah loo sameeyo, **haddana shakhsiyaadka u qalma ayaa u baahan in ay is qoraan.** Xataa haddii ka hor xukunkaaga dembiga weyn aad is qortay ama isku diiwaangelisay codbixinta ama aad codbixisay, waxaa la filan karaa in aad u baahato in aad dib isku qorto codbixinta.

Waxaa jira habab farabadan oo la isku qoro codbixinta.

Waxaa jira habab farabadan oo la isku qoro ama la isku diiwaangeliyo, xataa booqashada xafiisyada hanti dhowraha ama doorashooyinka degmada iyo meelo kaloo farabadan, xafiisyada dawladda sida Waaxda Shati bixinta (Department of Licensing) (DOL), Waaxda Adeegyada Bulsheed iyo Caafimaadka (Department of Social and Health Services) (DSHS), iyo badanaa dugsiyada, maktabadaha, iyo xerooyinka dabdemiska xaafadda ama degaanka.

Waxaad isku qori kartaa internetka halkan www.votewa.gov. Is qorista ama is diiwaangelinta internetka waxaa lagu heli karaa af Ingiriisi, Shiine, Fiyatnamiis, iyo Kooriyaan.

Waxaad weliba isku qori kartaa boostada. Is qorista ama is diiwaangelinta boostada waxaa lagu heli karaa 25 luqadood. Foomka boostada lagu soo diro ee af Ingiriisiga waxaa laga heli karaa internetka halkan: <https://bit.ly/3JjAWy7>.

FIIRO: Taariikho kama dambays ah ayaa u yaalla is qorista ama is diiwaangelinta. Waa in aad la xiriirto Xoghayaha Gobolka (Secretary of State), xafiiska doorashooyinka ama hanti dhowraha degmadaada, ama urur u dooda xuquuqda codbixinta si aad u ogaato taariikhaha kama dambaysta ah ee rasmiga ah. Waxaad booqasho ama shakhsi ahaan isku qori kartaa ama iskugu diiwaangelin kartaa codbixinta ilaa 8da habeenimo Maalinta Doorashada. Is qorista internetka iyo boostada waa in la helo 8 maalmood ka hor Maalinta Doorashada.

Waa maxay dukumeentiyada aan u baahan ahay si aan isku qoro codbixinta?

Waxay taasi ku xiran tahay sida aad iskugu qorto codbixinta:

Si aad iskugu qorto internetka waxaad u baahan tahay laysinka wadista baabuurta saxda ah ee gobolka Washington ama kaarka aqoonsiga gobolka Washington.

Si aad iskugu qorto boostada waa in aad sidoo kale u isticmaasho laysinka wadista baabuurta gobolka Washington iyo kaarka aqoonsiga gobolka. Haddii aadan haysanin dukumeentiyada aqoonsiga noocyadan ah, waxaad sheegi kartaa afarta xuruuf ama lambar ee ugu dambeeya lambarkaaga badbaadada bulsheed (social security number).

Haddii aadan haysanin laysinka wadista baabuurta, kaarka aqoonsiga gobolka, ama lambarka badbaadada bulsheed, waxaa la aqbali karaa dukumeentiyo aqoonsi oo noocyo kale ah. La xiriir Xoghayaha Gobolka si aad hagi uga hesho – eeg dhammaadka dukumeentiga si aad u hesho macluumaadka xiriirka. (Faahfaahinta sharciga, RCW 29A.08.107, oo ku taalla halkan <https://bit.ly/3oEiBDN>).

Uma baahnid guri ama cinwaan xasilloon si aad u codbixiso:

Marka aad is qorto ama isku diiwaangeliso codbixinta, waxaa lagu weydiin doonaa in aad bixiso labo cinwaan:

1. Cinwaanka aad deggan tahay

Waxay tani noqon kartaa magaca ama cinwaanka hoy, xadiiqo, guri matoor leh, kalagoys waddooyin, ama meel kaloo la garan karo. Waxaa goobtan ama meeshan loo isticmaali doonaa si loo go'aamiyo xaafadda codbixintaada iyo loollannada aad ka codbixin doonto.

Haddii aad leedahay cinwaan aanan caadi ahayn oo ku yaalla dhul qabiileed, dhisme uu qabiilku tilmaamay ayaad ku qori kartaa oo aad ka dhigi kartaa cinwaanka aad deggan tahay.

IYO

2. Cinwaanka boostada

Waxaad waraaqahaaga doorashooyinka ku heli kartaa meel kastoo sax ah oo boosto loo diro oo aad doorato. Cinwaanka boostada waxaa ka mid noqon kara sanduuqa xafiiska boostada (post office box), cinwaanka qof aad saaxiibbo ama qaraabo tihiin, hoy, ama keenista guud (general delivery) ee xafiiska boostada xaafaddaada ama degaankaaga. Cinwaanka boostadu waa meesha loo diri doono dhammaan qoraallada la xiriira doorashada, xataa warqaddaada codbixinta.

Haddii cinwaankaaga boostadu uu is beddelo oo aad cusboonaysiin weydo ka hor taariikhda kama dambaysta ah ee is qorista ama is diiwaangelinta, waxaad la xiriiri kartaa xafiiska doorashooyinka xaafaddaada si aad uga hesho warqad codbixin (ballot)!

Washington waa gobol lagu sameeyo codbixinta boostada. Degmo kaste waxaa yaalla sanduuqyo la soo dhigo waraaqaha codbixinta halkaasoo aad keeni karto warqaddaada codbixinta. Waxaad weliba boostada ku soo diri kartaa warqaddaada codbixinta adigoo aanan bixinin lacagta boostada. Degmo kaste waxaa weliba diyaar ka ah meelo laga codbixiyo oo ay isticmaali karaan shakhsiyadka naafooyin qaba. Xafiiska hanti dhowraha ama doorashooyinka degmadaada weydii macluumaad dheeraad ah.

Miyuu aniga iga lumi karaa xaq codbixintu ka dib marka la ii soo celiyo?

Haa. Haddii adiga lagugu xukumo dembi kaloo weyn, waxaa mar kale kaa lumi doona xaq codbixinta haddii lagugu xukumo waqti xabsi dhigis. Xaq uma yeelan doontid in aad codbixiso waqtiga aad gudanayso xukunka xabsiga buuxa ee waaxda DOC.

Maxaa dhacaya haddii aanan weli hubin in aan codbixin karo iyo in kale?

Haddii aad diiwaanka dembiyada ku qoran tahay oo aadan hubin in aad codbixin karto, **la xiriir ururka ACLU.** Wac lambarka 206.624.2180 ama booqo www.aclu-wa.org/help.

QAYBTA DOORASHOYINKA EE XOGHAYAHA GOBOLKA

www.sos.wa.gov/elections/voters

800.448.4881

Macluumaadka xiriirka xafiiska doorashooyinka degmadaada ayaad weliba ka heli kartaa halkan:

<https://www.sos.wa.gov/elections/viewauditors.aspx>

ama waxaad u wici kartaa Xoghayaha Gobolka.

Waxaad codbixinta iskugu qori kartaa internetka halkan www.votewa.gov.

ISUTAGGA COBBIYIYEYAASHA

HAWEENKA AH EE

WASHINGTON (LEAGUE OF WOMEN VOTERS OF

WASHINGTON)

www.lvwvwa.org

206.622.8961

Khad Bilaash ah:

800.419.2596

URURKA ACLU EE

WASHINGTON

www.aclu-wa.org

206.624.2180

ACLU

AMERICAN CIVIL LIBERTIES UNION
FOUNDATION

Washington